**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**XAFIISKA**
**GARYAQAANKA GUUD**

**ولاية بونت لاند**
**الصومالية**
**مكتب**
**المحامي العام للدولة**

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| | | | |
|---|---|---|---|
| SANADKA 21AAD | CADADKA 12AAD | TAARIIKH: 30/12/21 | Lam. 07 |

**FAAFINTA RASMIGA AH**

**OFFICIAL GAZETTE**

**الجريدة الرسمية**


# WAX-KA-BEDELKA SHARCIGA RUGTA GANACSIGA IYO WARSHADAHA PUNTLAND

## TUSMADA


| | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Wax-Kabedelka Sharciga Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr.7 ee December 29, 2021, kuna saabsan Wax-ka-bedelka Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80aad farqadiisa 16-aad

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/83/2021, kuna taariikhaysan December 26, 2021.

**Markuu tixgeliyey:** Baahidda loo qabo Wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

Sharciga soo socda:

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen **Wax-ka-bedelka Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland**

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal, Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**Tell:** +252-090-7797147; **E-mail:** dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; **Website:** www.plstate.so

**Tix:-XGGW/DPL/83/2021 Garoowe, Axad, Taariikh:- 26/12/2021**

**Ku:- Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

**Ujeeddo: - Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-aad

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/210/2021 ee November 1, 2021, kuna saabsan wax-ka-bedelka Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshada Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loò qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 49-aad, fadhigiisii 15-aad ee 29.11.2021 cod gacan taag ah **(38)** Mudane ku ansixiyeen Wax-ka-bedelka Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshada Puntland, diidmo iyo aamustoona ma aysan jirin.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND * OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

## DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
## GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

# WAX-KA-BEDDELKA XEERKA RUGTA GANACSIGA IYO WARSHADAHA PUNTLAND

## GAROOWE, DECEMBER, 2021



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Tusmada Xeerka

**Bogga**

CUTUBKA 1-aad
QODOBO HOR-DHAC AH ........ 1
Qodobka 1-aad ........ 1
Erey Bixin ........ 1
Qodobka 2-aad ........ 1
Magaca Xeerka ........ 1
Qodobka 3-aad ........ 1
Madax bannaanida Rugta Ganacsiga ........ 1
Qodobka 4-aad ........ 1
Adeega Guud ee Rugta ........ 1
Qodobka 5-aad ........ 1
Xarunta Rugta ........ 2
Qodobka 6-aad ........ 2
Ujeeddooyinka Rugta Ganacsiga ........ 2
Qodobka 7-aad ........ 2
Mabaadi'da Guud ee Rugta ........ 3
Qodobka 8-aad ........ 3
Wada shaqaynta Wasaaradda iyo Rugta ........ 3
CUTUBKA 2-aad ........ 3
QAAB-DHISMEEDKA ........ 3
Qodobka 9-aad ........ 3
Qaab-dhismeedka Rugta ........ 3
Qodobka 10-aad ........ 3
Golaha Guud ee Rugta ........ 3
Qodobka 11-aad ........ 3
Xilka iyo Waajibaadka Golaha Guud ee Rugta ........ 4
Qodobka 12-aad ........ 4
Shirka Golaha Guud ee Rugta ........ 4
Qodobka 13-aad ........ 4
Guddiga Maamulka ee Rugta ........ 5
Qodobka 14-aad ........ 5
........ 5

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Maamulka ee Rugta ........ 5
Qodobka 15-aad ........ 5
Shirka Guddiga Maamulka ee Rugta ........ 5
Qodobka 16-aad ........ 5
Shuruudaha Doorashada Guddoomiyaha iyo ku Xigeennadiisa ........ 6
Qodobka 17-aad ........ 6
Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga ........ 6
Qodobka 18-aad ........ 6
Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiye ku-xigeennada Rugta Ganacsiga ........ 6
Qodobka 19-aad ........ 6
Xil-Waayista Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga iyo Ku- Xigeennadiisa. ........ 7
Qodobka 20-aad ........ 7
Magacaabista Xoghayaha Guud ee Rugta ........ 7
Qodobka 21-aad ........ 7
Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha Guud ee Rugta ........ 7
Qodobka 22-aad ........ 7
Shuruudaha Magacaabista Xoghayaha Guud ee Rugta ........ 8
Qodobka 23-aad ........ 8
Xil-ka-qaadista Xoghayaha Guud ee Rugta ........ 8
CUTUBKA 3-aad ........ 8
XUBINNIMADA, SHAQAALAHA IYO XALLINTA KHILAAFAADKA ........ 8
Qodobka 24-aad ........ 8
Xubinnimada Rugta ........ 8
Qodobka 25-aad ........ 8
Shaqaalaha Rugta ........ 9
Qodobka 26-aad ........ 9
Xallinta Khilaafaadka ........ 9
CUTUBKA 4-aad ........ 9
HANTI-DHAWRKA RUGTA GANACSIGA ........ 9
Qodobka 27-aad ........ 9
Guddiga Hanti-dhawrka Rugta ........ 9
Qodobka 28-aad ........ 9
Awoodda Guddiga Hanti-dhawrka Rugta ........ 9



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

CUTUBKA 5-aad........................................................................................................
MAALIYADDA IYO KHIDMADAHA RUGTA ........................................................ 10
Qodobka 29-aad ................................................................................................ 10
Maaliyadda Rugta ............................................................................................ 10
Qodobka 30-aad ................................................................................................ 10
Go'aaminta Khidmadaha .................................................................................. 10
Qodobka 31-aad ................................................................................................ 10
Miisaaniyadda Rugta ....................................................................................... 10
Qodobka 32-aad ................................................................................................ 10
Xisaab-xirka ..................................................................................................... 10
CUTUBKA 6-aad ............................................................................................... 10
QODOBO GUNAANAD AH ................................................................................ 11
Qodobka 33-aad ................................................................................................ 11
Heshiiyada Rugta Ganacsiga ........................................................................... 11
Qodobka 34-aad ................................................................................................ 11
Kala Diridda Rugta ........................................................................................... 11
Qodobka 35-aad ................................................................................................ 11
Xeer Nidaamiyeyaal ......................................................................................... 11
Qodobka 36-aad ................................................................................................ 11
Burin/Laalid ..................................................................................................... 11
Qodobka 37-aad ................................................................................................ 11
Dhaqan-galka Xeerka ....................................................................................... 11
........................................................................................................................ 11



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 1-aad
# QODOBO HOR-DHAC AH
## Qodobka 1-aad
## Erey Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan;-

| Lr. | Ereyga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | Xeer | Waxaa loola jeedaa Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Dawladda Puntland. |
| 2. | Dawlad | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliya. |
| 3. | Wasiir | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha & Maalgashiga Dawladda Puntland. |
| 4. | Rug | Waxaa loola jeedaa Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Dawladda Puntland. |
| 5. | Wasaarad | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha & Maalgashiga Dawladda Puntland. |
| 6. | Guddoomiye | Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland. |
| 7. | Xoghaye | Waxaa loola jeedaa Xoghayaha Guud ee Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland. |

## Qodobka 2-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa "Xeerka Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Dawladda Puntland"

## Qodobka 3-aad
## Madax bannaanida Rugta Ganacsiga

1. Rugtu waa hay'ad madax bannaan, lehna Shakhsiyad qaanuuneed.
2. Rugtu waxay kulmisaa Ganacsatada, Warshedleyda, Beeralayda, Kalluumaysatada, Xoolo dhaqatada, Shirkadaha Adeegyada bixiya iyo qeybaha kale ee Ganacsatada.

## Qodobka 4-aad
## Adeega Guud ee Rugta

b. Bixinta shahaado asal ah ee la raacsho alaabooyinka Puntland laga dhoofsho oo dhan.
t. Xaqiijinta Warqadaha rasmiga ah iyo saxiixyada xubnaha Rugta.
j. Caddeynta qaan-sheegyada ganacsiga.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 5-aad
## Xarunta Rugta

Xarunta dhexe ee Rugtu waa magaalada Boosaaso, waxayna laamo ku yeelan kartaa dhammaan Gobollada kale ee Puntland iyo meeshii ay dan u aragto.

## Qodobka 6-aad
## Ujeeddooyinka Rugta Ganacsiga

Rugta waxaa loo aasaasay xaqiijinta arrimaha soo socda:

1. Wakiil ka noqoshada Ganacsatada Puntland kana shaqeynaysa horumarinta qaab xirfadeedka ganacsatada.
2. U horseedidda horumarinta dhaqan dhaqaale ee Puntland, dhiirigelinta wax soo saarka iyo kobcinta wax dhoofinta.
3. Raadinta suuqyo dibadeed oo ku habboon wax u dhoofinta khayraadka Puntland iyo kuwa kale ee ku habboon wax ka soo dhoofsashada.
4. Uruurinta, isku dubbaridka, faafinta qoraallada iyo wargeysyada ee saameeya Ganacsiga, Warshadaha, Beeraha, Xoolaha iyo Kalluunka
5. Uruurinta iyo xafidaadda namuunadaha kala duwan ee alaabooyinka la dhoofsho iyo kuwa la soo waarido.
6. Ka howlgalka ku dhiirigelinta ganacsatada abuurista iyo abaabulidda warshado yar yar.
7. Abuurista iyo abaabulidda qaab shirkadaynta ganacsatada.
8. La socodsiinta ganacsatada dhaqdhaqaaqa ganacsiga gudaha iyo dibadda.
9. Qaban qaabinta carwooyinka gudaha iyo ka qayb galka kuwa aduun-weynaha ee caalamiga ah.
10. U dhexeynta Dawladda iyo hantileyda gaar ahaaneed iyo u kala gudbinta labada dhinac talooyinka iyo ka wada tashiga arrimaha khuseeya horumarinta dhaqan- dhaqaale ee Puntland iyo la-diyaarinta shuruucda cusub ee saameeya dhaqaalaha.
11. U diyaarinta ganacsatada iyo beeralayda kala duwan tababarro la xiriira kor u qaadidda wax soo saar ee dalka gudihiisa iyo dibaddaba.
12. U-kuur-galka iyo wax ka qabadka aafooyinka ka hor yimaada dhaqaalaha Puntland iyo talo ka bixinta sidii looga hortagi lahaa, iyadoo lala kaashanayo ciddii aqoon u leh xal u helidda aafada
13. Magacaabidda ka qaybgalayaasha shirarka iyo siminaarada caalamiga ah ee khuseeya howsha rugta.
14. Ka taakuleynta hantileyda gaar ahaaneed sidii ay u heli lahaayeen maalgalin hay'adaha gudaha iyo dibada.
15. Abaabulka, xiriirka iyo iskaashiga rugtu la yeelanayso ururada carbeed, kuwa goboleed iyo kuwa caalamiga ahba.
16. Dhiirigelinta howl kasta oo horumarinaysa dhaqaalaha Puntland.
17. Ka qayb qaadashada dib-u-dhiska dhaqaalaha Puntland iyo nolosha bulshada.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 7-aad
## Mabaadi'da Guud ee Rugta

Xeerkani wuxuu ku dhisan yahay Mabaadi'dan soo socota:-

1. Dhaqaalaha suuqa xorta ah sida ku xusan qodobka 49-aad farqadiisa 1-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.
2. Dhex-dhexaadnimada, sinnaanta iyo faquuq la'aanta sida ku cad Dastuurka Puntland qodobkiisa 12-aad.
3. Isla-xisaabtanka iyo daah-furnnaanta.
4. Mudnaansiinta danaha ganacsatada.

## Qodobka 8-aad
## Wada shaqaynta Wasaaradda iyo Rugta

Wasaaradda iyo Rugtu waxay yeelanayaan xiriir wada shaqayn oo toos ah, iyadoo Wasaaraddu gaar u yeelanayso shaqooyinkan soo socda:

1. Diyaarinta Siyaasaddaha iyo Xeerarka lagu maamulayo Rugta Marka laga reebo xeer-nidaamiyeyaasha gaarka loo siiyey Rugta ee ku xusan qodobka 35-aad ee xeerkan.
2. Kormeeridda shaqada Rugta.

## CUTUBKA 2-aad
## QAAB-DHISMEEDKA
## Qodobka 9-aad
## Qaab-dhismeedka Rugta

Rugtu waxay u dhisan tahay sida soo socota:-

1. Golaha Guud ee Rugta.
2. Guddiga Maamulka ee Rugta.
3. Xoghayaha Guud ee Rugta.

## Qodobka 10-aad
## Golaha Guud ee Rugta

Rugtu waxay yeelanaysaa Gole Guud oo ka kooban xubnaha rugta isla markaana isugu jira Ganacsatada, Warshadleyda, Beeralayda, Xoolaleyda, Kalluumaysatada iyo shirkadaha Adeegyada bixiya oo Rugta xubno ka ah.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 11-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Golaha Guud ee Rugta

Golaha Guud ee Rugtu wuxuu u-xil-saaran yahay:-

1. Doorashada Guddiga Maamulka ee Rugta.
2. Oggolaanshaha qorsheyaasha guud ee lagu maamulo Rugta.
3. Ansixinta Miisaaniyadda rugta.
4. Doorashada guddiga hanti-dhawrka rugta.
5. Ansixinta Xeer hoosaadka Golaha Guud ee Rugta.
6. Talo-bixinta arrimaha La xidhiidha fulinta hawlaha Rugta.

## Qodobka 12-aad
## Shirka Golaha Guud ee Rugta

1. Shirka Golaha Guud ee rugta ee caadiga ah, waxaa la qabanayaa sannadkiiba hal mar bisha December.
2. Shirka Golaha Guud ee Rugtu wuxuu ku ansaxayaa marka ay joogaan kala bar lagu daray hal $(^{1}/_{2} +1)$ tirad guud ee xubnaha Rugta Ganacsiga.
3. Go'aamada Golaha Guud ee Rugtu wuxuu ansaxayaa cod hal dheeri ah.
4. Haddii tirada xubnaha Goluhu dhammaan-weydo kala bar lagu daray hal $(^{1}/_{2} +1)$ tirada guud ee xubnaha Rugta Ganacsiga, shirka waxaa dib loo dhigayaa muddo dhan 15 casho, haddii mar labaad tirada xubnuhu dhammaan weydo tirada loo baahan yahay waxaa dib loo dhigayaa 7 casho oo kale, hase ahaatee haddii mar sadexaad tiradu buuxsami weydo, waxaa waajibaya in guddiga maamulka ee rugtu isu casilo si toos ah, ka dibna xoghayaha guud ee rugta ayaa ku dhawaaqaya is casilaada ku timi Golihii maamulka ee rugta, shirweyne hor lehna ku baaqaya.
5. Xubnaha Golaha Guud waxaa lagu wargelinayaa qoraal iyo qalabka warbaahinta (Wargeysyada iyo Idaacadda), ugu yaraan 15 casho, ka hor waqtiga shirka Golaha Guud ee Rugta.
6. Golaha Guud ee Rugtu wuxuu yeelan karaa shir aan caadi ahayn, haddii ay noqoto Guddiga Maamulka ee rugta amaba ay codsadaan shan meelood meel ahaan (1/5), xubnaha rugta, iyagoo keenaya Ajandaha shirka.
7. Doodaha shirka Golaha Guud ee Rugta iyo go'aamadiisa waxaa lagu qorayaa diiwaan u gaar ah guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud ee Rugta.
8. Shirka Golaha Guud waxaa ka qayb geli kara xubnaha Rugta iyo Xoghayaha Guud oo kali ah.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 13-aad
## Guddiga Maamulka ee Rugta

1. Rugtu waxa ay yeelanaysaa Guddi Maamul oo ka kooban 15 xubnood, waxayna kala yihiin Guddoomiyaha, ku-xigeennadiisa iyo min 2 xubnood oo ka kala imaanaya dalladaha Rugta.
2. Guddiga Maamulka Rugta, waxaa isu sharixi kara xubin kasta oo xilka xubinimada Rugta si buuxda u haysata.
3. Xubin kasta oo loo doortay Guddiga maamulka Rugta waxay xilka haynaysaa/haynayaa muddo afar (4) sano ah oo ka bilaabata taariikhda la doortay.
4. Xubintu waxay luminaysaa xubinnimada Guddiga Maamulka ee Rugta hadii ay ka maqnaanto shirarka guddiga saddex jeer oo is-xiga sabab la'aan.
5. Xubinta Guddiga Maamulka Rugta ee bannaysa xubinnimada guddiga, waxaa beddelkeedu ku imanayaa sidii ay ku timi xubinitii hore.
6. Xubinta Guddiga Maamulka Rugta ee ku timaada beddel xubin hore, waxaa uu muddo xileedkeedu ku eg yahay muddada u harsaneyd xubintii hore ee lagu beddelay.

## Qodobka 14-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Maamulka ee Rugta

Guddiga Maamulka Rugtu wuxuu u xil-saaranyahay:

1. Hir-gelinta ujeeddooyinka rugta loo dhisay iyo fulinta go'aamada ay soo saaraan golaha guud ee rugta.
2. Guddiga maamulka ee rugta waxay yeelanayaan guddiyo inta ay u baahdaan, wayna adeegsan karaan xubin aan ku jirin guddiga maamulka oo aqoon looga maarmi waayey.
3. Diyaarinta miisaaniyad sannadeedka inta aan la horgeyn golaha guud ee rugta.
4. U gudbinta Xisaab xirka miisaaniyadda sannadkii dhammaatay guddiga hanti dhawrka iyo Golaha Guud si loo ansixiyo.
5. U soo bandhigidda wax qabadkii guddiga Maamulka shirka golaha guud ee rugta.

## Qodobka 15-aad
## Shirka Guddiga Maamulka ee Rugta

1. Guddiga Maamulka ee Rugtu wuxuu shirayaa bishiiba hal mar iyo kolkii loo baahdo.
2. Shirka Guddiga Maamulka Rugtu wuxuu furmayaa marka ay joogaan saddex-meelood laba meelood (2/3) tirada guud ee xubnaha Guddiga.
3. Dhammaan go'aamada guddigu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah, haddiise natiijada codbixintu is le'ekaato laba jeer, waxaa cod hal dheeri ah yeelanaya Guddoomiyaha Rugta ee fadhigaa guddoominaya.
4. Shirka Guddiga Maamulka ee Rugta, doodihiisa iyo go'aamadiisa waxaa lagu qorayaa diiwaan u gaar ah oo ay saxiixaan Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud ee Rugta.
5. Xoghayaha Guud ee Rugtu, fadhiga Guddiga Maamulka waa ka soo qayb gelayaa, ra'yigiisana waa ka dhiiban karaa, hase yeeshee ma yeelan karo awood codeyn.



XAFIISKA XEER ILAALIYAHA / ...ARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 16-aad
## Shuruudaha Doorashada Guddoomiyaha iyo ku Xigeennadiisa

Qof kasta oo loo dooranayo Guddoomiyaha ama ku-xigeennadiisa waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

1. Waa inuu yahay Soomaali, Muslim ah.
2. Waa in aanay da'adiisu ka yarayn 30 sano.
3. Waa inaan xuquuqdiisa muwaadinnimo la laalin Shantii (5) sano ee ugu dambeysey.
4. Waa inuu haystaa shahaadada heerka koowaad ee Jaamacadda.
5. Waa inuu leeyahay waayo aragnimo la xiriirta shaqadiisa.
6. Waa inuu xubin ka yahay Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Puntland.

## Qodobka 17-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga

Xilka Guddoomiyaha Rugtu waa:

1. Hoggaamiyaha guud ee rugta ganacsiga.
2. Fulinta hawl maalmeedka Rugta oo dhan.
3. Isugu yeeridda shirarka Golaha Guud iyo kuwa Guddiga Maamulka ee Rugta iyo guddoomintooda.
4. Hubinta iyo fulinta go'aamada Shirarka Golaha Guud iyo kuwa Guddiga Maamulka ee Rugta.
5. Wakiil ka noqoshada Rugta maxkamadaha hortooda.
6. Saxiixa heshiisyada Rugtu ay gelayso iyo arrimaha muhiimka ah.
7. Saxiixa go'aamada Golaha Guud iyo kan guddiga Maamulka ee Rugta.

## Qodobka 18-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiye ku-xigeennada Rugta Ganacsiga

Xilka Guddoomiye ku-xigeennada Rugtu waa:-

1. Guddoomiye ku-xigeennaddu waxay fuliyaan hawlaha uu u wakiisho ee aan ka baxsanayn xilka iyo waajibaadka Guddoomiyaha Rugta.
2. Waxay kala taliyaan Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga dhammaan hawlaha Rugta.
3. Guddoomiyaha Rugtu markuu maqan yahay waxaa dhammaan hawshiisa fulinaya Guddoomiye ku xigeenka 1-aad, hadduu isna maqnaado waxaa xilka gudoominta la wareegaya Guddoomiye- ku-xigeenka 2-aad ee Rugta Ganacsiga.
4. Haddii Guddoomiyuhu dhinto, is-casilo ama xilka laga qaado sabab kasta haku timaadee, Guddoomiye ku xigeenka 1-aad ayaa si ku-meel gaar ah u qabanaya xilka Guddoomiyaha inta laga dooranayo Guddoomiye Cusub.



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

5. Haddii xaaladaha ku xusan farqadda 4-aad ay ku dhacdo Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka 1-aad waxaa xilka Guddoomiyaha si ku-meel gaar ah u haynaya Guddoomiye ku-xigeenka 2-aad inta laga dooranayo Guddoomiye iyo Guddoomiye ku-xigeen 1-aad oo cusub.

## Qodobka 19-aad
## Xil-Waayista Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga iyo Ku-Xigeennadiisa.

Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga iyo ku-xigeennadiisu waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:

b. Geeri.
t. Xil gudasho la'aan joogto ah sabab kasta ha ku timaadee.
j. Ku kicidda falal lid ku ah jiritaanka rugta ama jabinta xeerarka rugta.
x. Mar walba oo ay muddada xil-hayntu ka dhammaato.
kh. Soo gudbinta istiqaalo qoraal ah lagana aqbalo .

## Qodobka 20-aad
## Magacaabista Xoghayaha Guud ee Rugta

1. Rugtu waxay yeelanaysaa Xoghaye Guud, wuxuuna metelayaa Xukuumadda Puntland.
2. Xoghayaha Guud ee Rugta waxay magacaabistiisu ku imaaneysaa talo-soo-jeedinta Wasiirka Wasaaradda, waxaana magacaabaya Madaxweynaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 21-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha Guud ee Rugta

Xogyahaya Guud wuxuu yeelayaa awoodaha iyo mas'uuliyadaha soo socda:

1. Habsami u socodsiinta iyo kormeeridda hawl maalmeedka Rugta.
2. Xoghayaha Guud ee Rugtu waa horjoogaha Shaqaalaha Rugta, kana mas'uul ah hawlgelintooda iyo qiimeynta waxqabadkooda.
3. Ka qayb-galka Shirarka Golaha Guud iyo kuwa Guddiga Maamulka Rugta, isagoo ka qayb-qaadanaya doodaha, mase laha codayn.
4. Soo diyaarinta Ajendayaasha shirka Golaha Guud iyo kan Guddiga Maamulka Rugta, isagoo ka talo qaadanaya Guddomiyaha Rugta.
5. Xoojinta xiriirka wada shaqeyneed ee Wasaaradda iyo Rugta.



...ARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 22-aad
## Shuruudaha Magacaabista Xoghayaha Guud ee Rugta

Qofka loo magacaabayo Xoghayaha Guud ee Rugta Ganacsiga waa inuu buuxiyaa shuruudaha hoos ku xusan:-

1. Waa inuu yahay Muwaadin soomaali, Muslim ah, guta waajibaadkiisa diiniga ah, xil-kas ah, garaadkiisu dhan yahay, da'diisuna aanay ka yarayn labaatan iyo Shan (25) sano.
2. Waa inuu leeyahay waxbarasho heer jaamacadeed oo xiriir la leh shaqadiisa.
3. Waa inuu leeyahay waaya aragnimo la xiriirta maamulka, maareynta iyo arrimaha Ganacsiga.
4. Waa inuu magac iyo sumcad wanaagsan ku dhex leeyahay bulshada.

## Qodobka 23-aad
## Xil-ka-qaadista Xoghayaha Guud ee Rugta

1. Xoghayaha Guud ee Rugta waxaa xilka lagaga qaadi karaa digreeto uu soo saaro madaxweynaha Dawladda Puntland ka dib marka ay sugnaadaan arrimahan soo socda:-
   b. Xil gudasho la'aan joogto ah sabab kasta haku timaadee.
   t. Ku kicidda falal lid ku ah jiritaanka Rugta ama uu jabiyo Xeerarka Rugta.
   j. Soo gudbinta istiqaalo qoraal ah lagana aqbalo.
2. Madaxweynuhu wuxuu muddo shan iyo toban (15) maalmood gudohood ah ku soo dhammaystirayaa magacaabista xoghayaha cusub ee Rugta.

# CUTUBKA 3-aad
# XUBINNIMADA, SHAQAALAHA IYO XALLINTA KHILAAFAADKA

## Qodobka 24-aad
## Xubinnimada Rugta

1. Xubinnimada Rugtu waxay u furan tahay qof kasta oo haysta Ruqsad Ganacsi, isla markaana ka diiwaan-gashan Rugta Ganacsiga, si joogto ahna u bixiya khidmadaha Rugta ee ku xusan qodobka 29-aad ee xeerkan.
2. Xubinnimada rugta waxaa lagu codsanayaa qoraal, iyadoo lagu soo lifaaqayo warqadaha caddeynaya arrimaha ku sheegan faqradda 1-aad ee qodobkan.
3. Xubinnimada Rugta waxaa lagu waayi karaa, marka ay xubintu ku kacdo falal ka hor imanaaya ujeeddooyinka Rugta loo aasaasay.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 25-aad
## Shaqaalaha Rugta

1. Rugtu waxay yeelanaysaa shaqaale u gaar ah.
2. Guddiga Maamulka ee rugta ayaa leh xilka shaqaaleynta, dallacsiinta, mushahar iyo gunno u sameynta, fasaxa, ganaaxa, abaalmarinta iyo shaqo ka joojinta shaqaalaha rugta, si waafaqsan xeerka shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Puntland xeer Lr. 12 ee 2018.

## Qodobka 26-aad
## Xallinta Khilaafaadka

Rugtu waxay dhex-dhexaadinaysaa, marka laga codsado, muranada saameeya ganacsiga ee ka dhex dhaca ganacsatada gudaha.

# CUTUBKA 4-aad
# HANTI-DHAWRKA RUGTA GANACSIGA
## Qodobka 27-aad
## Guddiga Hanti-dhawrka Rugta

1. Rugtu waxay yeelaneysaa hanti-dhawr oo laga soo dooranayo xubnaha Rugta, aqoon xeel-dheerna u leh cilmiga xisaabaadka.
2. Muddada xil haynta Guddiga hanti-dhawrka Rugtu waa afar (4) sano kana bilaabmaysa taariikhda la doortay.
3. Haddii Guddoomiyaha amaba xubnaha Guddiga Hanti-dhawrka ay xilkooda gudan waayaan caafimaad darro awgeed ama sabab kale, waxaa beddelaya xubnaha tirada codka ay heleen ku soo xiga.
4. Xubnaha Guddiga Maamulka rugta waxaa ka reebban in ay guddoomiye ama xubin ka noqdaan Guddiga Hanti-Dhawrka Rugta.

## Qodobka 28-aad
## Awoodda Guddiga Hanti-dhawrka Rugta

1. Guddiga Hanti-Dhawrka Rugtu, waxay awood buuxda u leeyihiin inay baaraan buugaagta iyo warqadaha rasmiga ah ee xisaabta rugta, waxayna xaq u leeyihiin in ay helaan macluumaadka rasmiga ah ee ku saabsan xisaabaha ay dalbadaan.
2. Guddiga Hanti-dhawrka Rugta, waxay warbixintooda u gudbiyaan Golaha Guud ee Rugta.



XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND / STATE GENERAL SOLICITOR / STATE OF PUNTLAND

# CUTUBKA 5-aad
# MAALIYADDA IYO KHIDMADAHA RUGTA
## Qodobka 29-aad
## Maaliyadda Rugta

Dakhliga Rugtu wuxuu ka imaanayaa:-

1. Khidmadda diiwaangelinta.
2. Dhigaal sannadeedka laga qaado xubnaha rugta.
3. Khidmadaha diiwaan-gelinta adeegyada kale, sida, sameynta shahaado asal ah ee la raacsho alaabooyinka Puntland laga dhoofsho IWM.
4. Kaalmo amaba tabaruc ay ka hesho Dawladda ama cid kaleba.

## Qodobka 30-aad
## Go'aaminta Khidmadaha

Guddiga Maamulka ee Rugta ayaa go'aaminaya heerka ay noqonayaan khidmadaha ay ka qaadato rugtu, adeegyada ku xusan qodobka 4-aad iyo khidmadaha diiwan-gelinta xubnaha Rugta iyagoo la kaashanaya Wasaaradda.

## Qodobka 31-aad
## Miisaaniyadda Rugta

1. Guddiga Maamulka Rugtu, wuxuu diyaarinayaa miisaaniyadda dakhliga iyo kharashka laba bilood ka hor dhammaadka sannad maaliyadeedka, iyagoo horgeynaya shirka Golaha Guud si uu u oggolaado.
2. Sannad maaliyadeedka rugtu wuxuu bilaabmayaa 1da January, wuxuuna dhammaanayaa 31 December sannad kasta.
3. Miisaaniyadda waxaa lagu caddeynayaa dhakhliga iyo kharashka ku baxaya maamulka Rugta iyo hirgelinta hawlaheeda iyo dayactirka hantidooda.

## Qodobka 32-aad
## Xisaab-xirka

1. Guddiga Maamulka Rugtu wuxuu diyaarinayaa xisaab-xirka saddexda bilood ee ugu horreeya sannad walba gudihiisa, sannadkii tegay miisaaniyadiisii, iyadoo la horgeynayo shirka Golaha Guud ee Rugta si uu u oggolaado.
2. Golaha Guud ee Rugtu markuu dhegaysto warbixinta Guddiga hanti-dhawrka ee Rugta, wuxuu go'aan ka gaarayaa oggolaanshaha xisaab-xirka miisaaniyadda.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

# CUTUBKA 6-aad
# QODOBO GUNAANAD AH
## Qodobka 33-aad
## Heshiiyada Rugta Ganacsiga

1. Rugta ganacsiga dawladda Puntland waxay gali kartaa heshiisyo gudaha iyo dibadda ah.
2. Heshiisyada ay Rugtu gelayso waa in ay noqdaan kuwa aan ka hor imaanayn siyaasadda dhaqaalaha iyo xeerarka kale ee dawladda Puntland.

## Qodobka 34-aad
## Kala Diridda Rugta

Madaxweynaha Dawladda Puntland wuxuu kala diri karaa rugta ka dib markuu helo talo soo jeedinta Wasiirka haddii ay sugnaadaan xaaladahan soo socda:

1. Mar kasta oo muddo xileedkoodu dhammaado doorashana la qaban waayo.
2. Cabashooyin joogto ah oo Ganacsatadu soo gudbiso xal waarana laga gaari waayo.
3. Haddii ay caddaato ku takrifal awoodeed iyo ku dhaqan la'aan Sharciga.

## Qodobka 35-aad
## Xeer Nidaamiyeyaal

Guddiga Maamulka Rugta wuxuu dejinayaa xeer-nidaamiyeyaasha xeerkan lagu dhaqan gelinayo waana sidan:

1. Xeer nidaamiyaha Maamulka Rugta.
2. Xeer nidaamayaha doorashada guddiga maamulka iyo guddiga hanti-dhawrka ee Rugta.
3. Xeer nidaamiyaha xalinta khilaafaadka iyo dhex-dhexaadinta murannada ganacsi iyagoo la kaashanaya Wasaaradda.

## Qodobka 36-aad
## Burin/Laalid

Waxaa la laalay xeer kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon Karin Xeerkan.

## Qodobka 37-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.